Foomka Oggolaanshaha Tallaalka COVID-19 ee Shakhsiyaadka 5-17 Sano Jirka ah

Qeybta 1: Xog ku saabsan ubadka si loo helo tallaalka Pfizer COVID-19 *(fadlan daabac)*:

Magaca Ilmaha (Magaca Dambe, Koowaad, Dhexe)

Taariikhda Dhalashada (bi/ma/sdka)

Da'da

Cinwaanka Jidka

Degmada

Gobolka

Sumadda Boostada [Zip]

Taleefan Lambar

Qeybta 2: Xog ku saabsan Tallaalka Pfizer

Ilmahaaga waxa la siinayaa tallaalka COVID-19 oo ay samaysay Pfizer-BioNTech. Tallaalka Pfizer-BioNTech COVID-19 waxa ansixisay Waaxda Maamulka Cuntada iyo Dawooyinka ee Maraykanka (U.S. Food and Drug Administration) (FDA) oo loogu talagalay dadka da'doodu ka weyn tahay 16 sano jir, magaca sumadda loo bixiyayna waa Comirnaty. Sidoo kale waaxda FDA waxay soo saartay Ruqsadda Adeegsiga Degdegga ah ee Tallaalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech: (i) ee loogu talagalay isticmaalka isku xiga ee tallaalka dadka da'doodu tahay 5 sano jir iyo ka weyn, (ii) sida hal qiyaas oo xoojin ah ugu yaraan 5 bilood ka dib marka la qaato dhammaystirka taxanaha aasaasiga ah ee shakhsiyaadka 12 sano jirka iyo ka weyn; iyo, (iii) sida aasaasiga ah ee saddexaad qiyaas taxanaha oo tallaal ah ugu yaraan 28 maalmood ka dib qiyaasta labaad ee difaaca jirka ee shakhsiyaadka 5 sano jirka ah iyo kuwa ka weyn. Labada Tallaal ee Pfizer-BioNTech COVID-19 iyo Isku-dhafka waxaa loo qaataa qaab taxan 2-garoojo ah, oo ay qaadashadoodu udhexeyso 3 toddobaad.

Qofka tallaalka bixinaya wuxuu u baahan doonaa macluumaad qaar oo ku saabsan taariikhda caafimaadka ilmahaaga ka hor inta aan la tallaalin. Su'aalahaas halkan ayaa laga karaa www.mass.gov/CDCScreeningForm.

Tallaalka COVID-19 ee Janssen ayaa laga yaabaa inuusan cudurka ka difaaci karin qof walba. Tiro dad ah ayaa laga yaabaa inay la kulmaan waxyeelooyin ka dib marka ay qaataan tallaalka. Waxyeellooyinka soo raaca ee la soo sheegay waxaa ka mid ah xanuunka goobta la duray, daal, madax-xanuun, murqo xanuun, qarqaryo, xanuun dhanka kalagoyska, qandho, barar goobta la duray, goobta la duray oo guduudata, lallabbo, dareen la'aan, iyo qanjirada oo barara. Waxaa jirta halis yar oo ah in tallaalka uu

[1]*Tallaalkan, "difaacooda hooseeyo" waxaa ku jira shakhsiyaadka lagu tallaalay xubin adag ama shaqsiyaadka kuwa laga helay xaalado loo arko inay leeyihiin heer u dhigma ee difaaca jirka ah.*

sababi karo falcelin xasaasiyadeed oo daran. Falcelinta xasaasiyadeed ee daran ayaa caadiyan dhacda gudaha dhowr daqiiqadood illaa hal saac kadib markii la qaato tallaalka. Sababtan darteed, qofka tallaalka bixinaya ayaa ku weydiisan kara inaad joogto meesha aad ka qaadatay tallaalkaaga si laguula socdo tallaalka kadib. Calaamadaha fal-celinta xasaasiyadda ee daran waxaa ka mid noqon kara neefsashada oo ku adkaata, barar dhanka wejiga iyo cunaha, garaaca wadnaha oo degdeg ah, iyo/ama finan xun oo jirka oo dhan ka soo baxa.

Wixii macluumaad dheeraad ah waxaa laga heli karaa Pfizer-BioNTech COVID-19 Tallaalka "Xaashka Xaqiiqda ee Qaatayaasha iyo Daryeel bixiyayaasha" ee laga heli karo:

- Qaatayaasha iyo Daryeel bixiyayaasha 5-11 sano jirka (fda.gov)
- Qaatayaasha iyo Daryeel bixiyayaasha 12 sano iyo ka weyn (fda.gov)

Qeybta 3: Oggolaansho

OGGOLAANSHAHA TALLAALKA ILMAHA YAR: Waxaan dib u eegay macluumaadka ku saabsan Pfizer-BioNTech iyo Comirnaty COVID-19 Tallaalka gudaha **Qaybta 2** ee kot oo fahan halista iyo manfacyada. Anigoo hoos ku muujinaya ogolaanshahayga, waxaan ku raacsan nahay in:

1. Foomkan u oggolaanshaha dib ayaan u eegay, oo waan fahamsannahay in "Xaashka Xaqiiqda ee loogu Talagalay Qaatayaasha iyo Daryeel bixiyayaasha," ay ku qoran tahay xog faahfaahsan oo dheeraad ah oo ku saabsan halista iyo faa'iidooyinka tallaalka Pfizer-BioNTech iyo Comirnaty COVID-19.
2. Waxaan awood sharci ah aan u leeyahay inaan oggolaansho aan bixin karo in ilmaha kor lagu xusay lagu tallaalo tallaalka Pfizer-BioNTech ama Comirnaty COVID-19.
3. Aniga waan fahamsanahay inaanan la iiga baahnayn in aan horey u raaco canugga kor ku xusan maalinta ballanta tallaalka iyo in, marka oggolaanshahayga hoos la bixiyo, uu ilmuhu heli doono tallaalka Pfizer-BioNTech ama Comirnaty COVID-19 haddii aan joogo iyo haddii kaleba ee maalinta ballanta tallaalka.
4. Haddii aniga aan haysto caymis caafimaad oo bixinaya ama daboolaya cabyga magaciisa kor ku qoran, waxaan shirkaddayda caymis u fasaxay lagu soo dallaco kharashaadka kuwa Tallaalka Pfizer Comirnaty COVID-19 bixinaya. Dawladdu ayaa bixinnaysa kharashka tallaalka Pfizer Comirnaty COVID-19 laftiisa, oo aniga la iiguma soo dallici doono qaybta kharashka tallaalkayga.
5. Aniga waan fahamsanahay in sida uu iiga baahan yahay sharciga gobolka, dhammaan tallaallada waxaa lagu wargelin doonaa Waaxda Caafimaadka Dadweynaha Massachusetts Nidaamka Macluumaadka Tallaalka (MIIS). Xaashida Xaqiiqda ee loogu talgalay Waalidiinta iyo Bukaanka ee MIIS, ee www.mass.gov/dph/miis, wixii macluumaad ah ee ku saabsan MIIS iyo waxa la sameeyo haddii aan diido xogtayda ama qoyskayga in lala wadaago bixiyeyaasha kale ee MIIS.

WAXAAN OGGOLAANSHO KU BIXINAYAA in ubadka xaga sare ee foomkan ku qoran in lagu tallaalo Tallaalka Pfizer-BioNTech ama Comirnaty COVID-19 oo dib ayaan u eegay oo waan oggolaaday macluumaadka ku qoran **Qaybta 3** foomkan. (Haddii oggolaanshahan aan la saxiixin, aan lagu qorin taariikhda, oo aan la soo celin, marka ilmaha lama tallaali doono.)

Saxiixa Wakiilka Sida Sharciga ah loo Igmaday *Taariikhda*